## LAANTA SHARCIGA EE MAINE

| | | |
|---|---|---|
| ☐ shaqsi ahaan ah **iyo** ka wakiil ah: | Dacwoodaha | MAXKAMADDA DEGMADA<br>Goobta (Magaalada): ____________<br>Lambarka Dacwadda.: ____________ |
| ☐ ka wakiil ah: | | |
| V. | | |
| ☐ ka wakiil ah: | Eedeysanaha | |

**AMARKA KA-HORTAGGA XADGUDUBKA**
**☐ LA BADDALAY ☐ LA KORDHIYAY ☐ IS-AF-GARAD ☐ GARMAQALKA KADIB**
19-A M.R.S. § 4110

> **FADLAN OGOW:** Koodhka 3-lambar ee ku yaala bidix ee xaaladaha hoos ku xusan waxaa loogu talagalay isticmaal gudaha ah oo keliya, waana la iska indhatiri karaa.

Codsiga Dacwoodaha ee ilaalinta waa:

☐ loo oggolaaday.

☐ loo diiday qayb ahaan. Kuwa soo socda ayaa lagu ilaalinayaa sida ku xusan Qodobkan (*qor/dooro qolo kasta oo la ilaalinayo*):

________________________________________

☐ Eedeysanaha waxaa la soo gaarsiiyay dacwadda asalka ah ee ka-hortagga xadgudubka iyo warqadda maxkamadda:

[837] ☐ si kale oo beddel ah

[838] ☐ si shakhsi ah gacanta loogu dhiibay.

Kadib ogeysiis habboon iyo:

☐ fursad dhageysi buuxa, iyadoo dhinacyada soo socda ay joogeen:

[835] ☐ dacwoodaha

[836] ☐ eedeysanaha.

☐ dhageysi buuxa oo ku saabsan mudnaanta dacwadda ka-hortagga xadgudubka, iyadoo dhinacyada soo socda ay joogeen:

[832] ☐ dacwoodaha

[833] ☐ eedeysanaha.

**MAXKAMADDU WAXAY HESHAY IN DACWOODUHU UU U QALMO AMAR ILAALIN AH SIDA SOO SOCOTA:**

[339] ☐ (1) Dhinacyadu waa xubno qoys ama isku reer ah sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(6);
Maxkamaddu sidoo kale waxay ogaataa in dhinacyadu yihiin (*calaamadee haddii ay khuseyso):*

[351] ☐ xaasaska hadda ama xaasaska hore

> **Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
> **Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

[354] ☐ waalidiinta ilmo wadajir ah, ama

[355] ☐ dad wada deganaa ama hore u wada deganaa

[340] ☐ (2) Dhinacyadu waa lamaane shukaansi sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(4); ama

[341] ☐ (3) Dacwooduhu si kale ayuu xaq ugu leeyahay ilaalin sida ku xusan 19-A M.R.S. §§ 4103(1)(B), (2)(B), ama (3).

**MAXKAMADDU WAXAY GELINAYSAA QODOBKAN ILAALINTA IYADOO KU SALEYNAYSO NATIIJADA LA HELAY EE AH:**

[342] ☐ (4) Eedeysanuhu wuxuu xadgudub ku sameeyay dacwoodaha sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(1); iyo/ama

☐ (5) Eedeysanuhu wuxuu galay falal lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4103 sida soo socota

[343] ☐ daba-gal, 17-A M.R.S. § 210-A;

[344] ☐ xadgudub galmo 17-A M.R.S., cutubka 11;

[345] ☐ faafinta aan oggolaanshaha lahayn ee sawirro gaar ah, 17-M.R.S. § 511-A;

[346] ☐ ka ganacsiga galmada ee xadgudubka ah ama ka ganacsiga galmada, 17-A M.R.S. §§ 852 ama 853;

[347] ☐ ka faa'iidaysiga galmada ee ilmo aan qaan-gaarin, 17-A M.R.S. § 282;

[348] ☐ faafinta waxyaabo galmo oo muuqda, 17-A M.R.S. § 283;

[349] ☐ dhibaataynta ilmo aan qaan-gaarin, 17-A M.R.S. § 506;

[357] ☐ xadgudub sida lagu qeexay 22 M.R.S. § 3472(1); iyo/ama

[350] ☐ Wax kale:

______________________________________________

______________________________________________

[851] ☐ (6) Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen Amarka soo socda, kaas oo la sameeyay **iyada oo aan la helin** go'aan sheegaya xadgudub sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(1) ama **iyada oo aan la helin** go'aan sheegaya in eedeysanuhu galay falalka lagu qeexay19-A M.R.S. §§ 4103(1)(B), (2)(B), ama (3).

[388] ☐ (7) Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen Amarka soo socda, kaas oo la sameeyay**iyadoo la helay go'aan** sheegaya xadgudub sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(1) ama **iyadoo la helay go'aan** isheegaya in eedeysanuhu galay falalka lagu qeexay 19-A M.R.S. §§ 4103(1)(B), (2)(B), ama (3).

**MAXKAMADDU SIDOO KALE WAXAY OGAATAY IN:**

[352] ☐ (8) Eedeysanuhu uu khatar dhab ah ku yahay badbaadada jireed ee dacwoodaha/ilmaha(carruurta) aan qaan-gaarin.

[353] ☐ (9) Eedeysanuhu uu ku kacay xadgudub dhaqaale oo ka dhan ah dacwoodaha sida lagu qeexay 19-A M.R.S. § 4102(5).

**SIDAA DARTEED, waxaa HALKAN lagu AMRAY in:**

[839] ☐ (A) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu hanjabo, weeraro, faraxumeeyo, waxyeelleeyo, dhibaateeyo, daba-galo, ama si kale ugu xadgudbo dacwoodaha iyo ilmo(carruur) kasta oo aan qaan-gaarin oo ku nool guriga. Tani waxaa ka mid ah mamnuucida isticmaalka, isku dayga isticmaalka, ama isticmaalka hanjabaada la xariira sida xoog jir kaas oo si macquul ah loo filayo inuu dhaawac jireed u geysto dacwoodaha ama ilmo yar oo deggan guriga.

[356] ☐ (B) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu wax xiriir ah, si toos ah ama si dadban, la yeesho dacwoodaha,

[841] ☐ marka laga reebo xiriirka lagu oggolaaday faqradda I iyo/ama P ee hoose.

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

[840] ☐ marka laga reebo:
___
___
___

[359] ☐ (C) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu tago ama galo guriga dacwoodaha.

[360] ☐ (D) Eedeysanaha waxaa laga xannibay inuu si joogto ah oo aan sabab macquul ah lahayn, u daba-galo ama u raaco dacwoodaha.

[361] ☐ (E) Eedeysanaha waxaa laga xannibay inuu si joogto ah oo aan sabab macquul ah lahayn ugu sugo ama ugu dhowaado guriga, iskuulka, ganacsiga, ama goobta shaqada ee dacwoodaha.

[362] ☐ (F) Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu tirtiro, ama soo celiyo sawirrada gaarka ah, ama uu faro in la tirtiro, la burburiyo, ama la soo celiyo sidoo kalena waxaa lagu amray inuu joojiyo faafinta sawirrada gaarka ah, waxaana laga mamnuucay faafin kasta dheeraad ama mustaqbalka ah ee sawirradaas.

☐ (G) **AMAR MAMNUUCAYA HAYSASHADA IYO FARAYA SOO GUDBINTA QORIGA IYO HUBKA:**

1. Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu haysto waxaana lagu amray inuu wareejiyo/iska dhiibo waxyaabaha soo socda:

   [363] ☐ Dhammaan qoryaha lagu qeexay 17-A M.R.S. § 2(12-A);dhammaan qoryaha muzzle-loading-ka ah, qaansooyinka, qori-qaanseedka, iyo dhammaan hubka kale ee khatarta ah sida lagu qeexay 17-A M.R.S. § 2(9);

   [364] ☐ Hubka kale
   ___
   ___

2. Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu wareejiyo/iska dhiibo dhammaan waxyaabaha kor ku xusan inta uu amarkani shaqaynayo:

   [365] ☐ **Isla markiiba marka Amarkan la gaarsiiyo;**

   [366] ☐ **24 saacadood Gudahood;**

   [367] ☐ **Saacado __________ gudahooda (waa inay ka yar yihiin 24 saacadood)**

Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu soo wareejiyo dhammaan waxyaabaha kor ku xusan (*door mid ka mid ah kuwa soo socda*)**:**

[368] ☐ Hay'ada sharci fulinta. Maxkamaddu waxay ku amraysaa hay'adda sharci fulinta ee fulinaysa Amarkan ah in eedeysanaha uu isku-dabarido wareejinta/iska dhiibista qoryaha, marka laga reebo haddii eedeysanaha Amarka u geeyo sarkaal ammaan maxkamadeed, markaas hay'adda sharci fulinta ee soo socota ayaa lagu amray inay isku dubbariddo wareejinta qoryaha hubabka ee eedeysanaha: ______________________________ ___________________________. Hay'adda mas'uulka ah waxaa caawin kara hay'ado kale oo sharci fulin ah haddii loo baahdo. Hay'adda sharci fulinta waa inay buuxiyaan Ogeysiiska Wareejinta Hubka ee ay tahay inay Dhammeystiraan Sharci Fulintu (PA-024) oo ay maxkamadda u gudbisaa sida lagu faray foomkaas.

[369] ☐ Qof kale, lagu magacaabo_______________________________________________.

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

3. Haddii qoryaha iyo/ama hubka kor lagu sharaxay lagu wareejiyo qof aan ahayn sarkaal sharci fulin ah, eedeysanuhu waa inuu 24 saacadood gudahood kadib wareejinta, buuxiyaa Ogeysiiska Wareejinta Hubka ee uu Buuxinayo Eedeysanaha (PA-025) oo uu u gudbiyaa

   [371] ☐ maxkamadda; ama

   [372] ☐ ______________________________ (hay'adda sharci fulinta ee deegaanka).

**<u>DIGNIIN</u>: Xitaa haddii sanduuqa G aan la calaamadeyn, haysashada qori ama rasaas inta Amarkani shaqaynayo wali waa laga yaabaa inay mamnuuc tahay sida ku xusan 15 M.R.S. § 393 ama sharciga federaalka haddii sanduuqa A la calaamadeeyay.**

**Haddii Amarkani ka mamnuuco eedeysanaha haysashada qoryaha, qoryaha muzzle-loading-ka ah, qaansooyinka, qoryo-qaanseedyada, ama hubka kale ee khatarta ah sida ku xusan faqradda G, maxkamaddu waxay markaas kadib soo saari kartaa amar baaritaan oo u oggolaanaya sarkaal sharci fulin ah inuu qabto qoryaha, qoryaha muzzle-loading-ka ah, qaansooyinka, qori-qaanseedka, iyo hubka kale ee khatarta ah meel kasta haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu aaminsan yahay in eedeysanuhu uusan wareejin/iska dhiibin hubkaas. 19-A M.R.S. § 4110(4).**

[375] ☐ (H) Dacwoodaha waxaa la siiyay lahaanshaha, eedeysanahana waa laga saaray lagana mamnuucay inuu galo guriga ku yaala (*qor liiska, haddii aanu qarsoodi ahayn*):

______________________________

______________________________

______________________________

☐ (I) Dacwoodaha waxaa la siiyay ku-meelgaar

[852] ☐ keligii ah

[853] ☐ la wadaago

xuquuqda iyo mas'uuliyadda waalidnimo ee ilmaha(carruurta) aan qaan-gaarin, kuwaas oo magacyadooda iyo taariikhaha dhalashadooda (*mm/dd/yyyy*) ay yihiin sida soo socota:

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

[376] ☐ Xuquuqda xiriirka ee eedeysanaha waa sida soo socota loo xaddiday:

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

[378] ☐ (J) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu dhaawaco ama u hanjabo inuu dhaawaco xayawaanada soo socda ee ay leeyihiin, haystaan, kiraysan yihiin, ama ay hayaan labada dhinac ama ilmo aan qaan-gaarin oo guriga ku nool (magaca/sharaxaadda xayawaanka):

______________________________

______________________________

______________________________

**<u>DIGNIIN</u>: Ku xad-gudubka amarka ku qoran faqradda (A) ilaa (J) mar walba waa dembi Heerka D ah, mararka qaarna waa Heerka C, sidoo kalena wuxuu noqon karaa ku-xadgudub maxkamadeed.**

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

**FADLAN OGOW: Haddii Amarkan uu dejiyo ama saameeyo xannaanada ama xuquuqda waalidnimo ee ilmo aan qaan-gaarin, mid ka mid ah dhinacyada waa inuu bilaabo dacwad qoys, si loo sameeyo amar joogto ah oo ku saabsan xuquuqda iyo mas'uuliyadda waalidnimo ee ilmaha.**

**Waxaa SIDOO KALE LAGU AMRAY SIDA SOO SOCOTA** *(kaliya kuwa la calaamadeeyay ayaa khuseeya):*

☐ (K) Eedeysanaha waa inuu bixiyo masruuf carruur sida ku cad amarka masruufka ee ku lifaaqan.

☐ (L) Eedeysanaha waa inuu qaataa la-talin oo ka timaadda shaqaale bulsho, hay'ad adeeg qoys, xarun caafimaad maskaxeed, adeeg nafsi/dhimir, ama adeeg hagid kale sida soo socota:

________________________________________________________

________________________________________________________

☐ (M) Eedeysanaha waa inuu bixiyo lacag dhan $________________ todobaad ☐ kasta ☐ bishii si uu ugu taageero dacwoodaha. Bixinta koowaad waxay ku beegan tahay (*mm/dd/yyyy*) ____________________________.

☐ (N) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu farageliyo ama burburiyo hantida dacwoodaha.

☐ (O) Hantida gaarka ah iyo alaabta guriga ee labada dhinac waxaa loo qaybiyay sida soo socota:

________________________________________________________

________________________________________________________

waxaana la soo saaray amar ilaalin hanti ah sida soo socota:

________________________________________________________

________________________________________________________

☐ (P) Xuquuqda xiriirka ee eedeysanaha waa sida soo socota loo xaddiday:

________________________________________________________

________________________________________________________

☐ (Q) Waxaa la soo saaray amar ku saabsan daryeelka, xannaanada, iyo maamulidda xoolaha ay leeyihiin labada dhinac ama xoolaha ilmaha aan qaan-gaarin ee guriga ku nool:

________________________________________________________

________________________________________________________

☐ (R) Eedeysanuhu waa inuu joojiyo caymis nololeed kasta ama gaadiid uu isagu leeyahay haddii dacwooduhu yahay qofka caymiska ku jira. Marka Amarkan la soo saaro, eedeysanuhu waa inuu u diraa nuqul ka mid ah amarkan shirkadda caymiska ee bixisay siyaasadda.

☐ (S) Eedeysanaha waxaa laga mamnuucay inuu burburiyo, wareejiyo, ama faragelin ku sameeyo baasaboorka dacwoodaha ama dukumintiyada socdaalka ee kale ee uu haysto eedeysanuhu.

☐ (T) Waxaa SIDOO KALE LAGU AMRAY:

________________________________________________________

________________________________________________________

________________________________________________________

☐ (U) Eeg warqadaha dheeraadka ah ee ku lifaaqan, kuwaas oo qayb ka ah Amarkan.

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

**AMARRADA XUKUNKA LACAGTA:**

☐ (V) Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu siiyo dacwoodaha lacag dhan $________________ isla markiiba, taasoo ah magdhow lacageed oo loogu talagalay khasaaraha si toos ah uga dhashay xadgudubka, waxaana ku waajib ah fulin.

☐ (W) ☐ dacwoodaha ☐ waxaa lagu amray inuu bixiyo ________________________________________ isku darka $_______________ kharashka qareenka $__________________ kharashka maxkamadda. Bixinta waa in lagu sameeyaa ______________ maalmood gudaheed, waxaana ku waajib ah fulin.

☐ (X) Amar masruuf carruur lama bixinayo waqtigan☐ laakiin waxaa la soo saari doonaa marka dhinacyadu gudbiyaan Warqad ballanqaad masruuf carruur, oo la gudbinayo ugu dambeyn (*mm/dd/yyyy*) ______________________ ☐ sababtoo ah waxaa jira amar masruuf carruur oo hore u jiray.

☐ (Y) Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu bixiyo ____________________________________________ kharashaadka la xiriira $______ ka saarista, burburinta, ama soo celinta sawirrada gaarka ah.

☐ (Z) Marka la eego ka ganacsiga galmada, eedeysanaha waxaa lagu amray inuu bixiyo magdhow la xiriira soo celinta ama hagaajinta baasaboorka dacwoodaha ama dukumiintiyada socdaalka ee kale iyo/ama inuu bixiyo deymo kasta oo dacwoodaha ka soo gaaray xiriirka ka ganacsiga galmada. Eedeysanaha waxaa lagu amray inuu bixiyo _________________________________ isku-darka xisaabta ee $________________.

**DIGNIIN: Ku xad-gudubka faqradda (K) ilaa (Z) waxaa laga yaabaa inuu noqdo ku-xadgudub maxkamadeed. Qodobadan sidoo kale waa kuwo lagu fulin karo sida xukun madani.**

**DIGNIIN KU SOCOTA EEDAYSANAHA: Inta Amarkani shaqeynayo, waa inaad si buuxda u raacdaa. Qofna, oo ay ku jirto dacwoodaha, ma siin karo oggolaansho aad ku jebiso Amarkan.**

**FADLAN OGOW: Haddii eedeysanaha lagu amro bixinta masruuf carruur sida ku xusan faqradda (K), dhinac kasta waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu adeegsado adeegyada fulinta masruufka ee Qaybta Taageerada Dhaqangelinta iyo Soo kabashada (Division of Support Enforcement and Recovery, DSER) ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha. Si aad wax badan u ogaato, la xiriir DSER lambarka 207-624-4100.**

Amarkani wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba wuxuuna sii jiri doonaa si buuxda ilaa (*mm/dd/yyyy*) ___________________________, haddii aan horey loo beddelin ama loo burin amar maxkamadeed, ama marka la eego Masruuf Carruur ama Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda Waalidnimo, uu beddelo Garsoore ama Xukume.

**Waxaa la AMRAY** in nuqul ka mid ah Amarkan gacanta loogu dhiibo eedeysanaha iyadoo loo marayo hay'adda sharci fulinta ee soo socota ________________________________________________, ama hay'ad kale oo sharci fulin ah oo la oggol yahay. Nuqullada Amarkan waxaa karraanigu siin doonaa hay'adda sharci fulinta ee leh awoodda goobta uu deggan yahay dacwooduhu.

Amarkan waxaa lagu daray faylka maxkamadda iyadoo la raacayo M.R Civ. P. 79(a).

Tariikhda (*mm/dd/yyyy*): ______________________________ ► ______________________________

Garsoore, Maxkamadda Degmada

Nuqul sax ah, waan xaqiijinayaa: ______________________________

Karraani

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

## LAANTA SHARCIGA EE MAINE

**SOO CELINTA ADEEGA**

Markay ahayd taariikhda (*mm/dd/yyyy*) ___________________, saacadda ___________ ☐ AM ☐ PM, waxaan sameeyay Amarka Ka-hortagga Xadgudubka anigoo nuqulka gacanta ku siiyay eedeysanaha meel ku taal ________________________________________

________________________________________________________________________________

Taariikhda dhalashada eedeysanaha (*mm/dd/yyyy*): _________________ ► ________________________________

Saxiixa Sarkaalka Idman

________________________________ ________________________________

Hay'adda Sharci Fulinta

Magaca la daabacay ee Sarkaalka Idman

**Ogeysiiska ADA:** Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.
**Adeegyada Luqada:** Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.